ADRC Aging & Disability Resource Center

Wax Badan Iiga sheeg...

Program of All-Inclusive Care for the Elderly (PACE) (Barnaamijka Dhammaan Barnmaaijka Daryeelka oo Dhan yahay ee Waayeelka)

Waa maxay Program of All-Inclusive Care for the Elderly?

Program of All-Inclusive Care for the Elderly (Barnaamijka Dhammaan Barnmaaijka Daryeelka oo Dhan yahay ee Waayeelka), sidoo kale loo yaqaan sida PACE, waa barnaamij hal abuur ee bixiyaa daryeel muddo dheer oo si buuxdo u kala duwan, adeegyada caafimaadka iyo daawada, iyo daawooyinka la qoray ee kuu suurtogalinayo inaad u noolaatid sida qof madax banaan ee suurtogal ah.

Daryeelka xiliga dheer ee adeeg kasta ama taageerada laga yaabo inaad u baahato sida ay sababtay naafanimada, sii gaboobida, ama qabista jirro raagta oo xadida kartida lagu sameeyo waxyaabaha aad u baahantahay inaad ku sameyso dhinaca xaalada maalintaada. Tan waxaa ka mid ah waxyaabaha sida qubayska, lebisashada, samaynta cuntadda, shaqo aadida, bixinta biilasha, iyo wax badan. Waxaa jiro adeegyo kala duwan iyo taageerada laga heli karo PACE ee caawin karaa dadka u sameeyaa waxyaabahaan si madax banaan, ama ay la jiraan taageerada qof kale. Qaar ka mid ah adeegyadaan waxaa lagu bixin karaa Xarunta PACE, haddii aad dooratid inaad ka qeybgashid Xarunta.

PACE sidoo kale waxay dabooshaa adeegyadaada caafimaad iyo daawada, oo ay ku jiraan adeegyada dhakhtarka, kalkaaliso diiwaangashan, caawiyaha dhakhtarka, ama xirfadlayaasha kale ee u qalma. Sare u qaadida caafimaadka, ka hortaga cudurka, dayactirka caafimaadka, iyo waxbarashada bukaanka sidoo kale waa la bixiyaa. Intaa waxaa dheer, adeegyada daawada Medicaid iyo Medicare waxaa bixiyaa Ururada Daryeelka La maamulo (Managed Care Organization, MCO), taas oo ka shaqeyso PACE. Haddii aad iska diiwaangelisay PACE, kadib uma baahnid inaad heshid Medicare gooni ah ee qorshaha daawada Part D.

Xiriirinta daryeelkaaga muddada dheer, caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka, iyo daawooyinka qoran oo wada socdo, barnaamijkaan wuu kugu haboonyahay oo wax tar u leh howlgalkeeda.

Sidee ayay PACE u Shaqeysaa?

Dadku waxay Helaan Maamulka Daryeelka Qaybaha Kala duwan.

Aqoonsashada baahiyadaada, maxaa la heli karaa, iyo ogaanshaha wax ku saabsan daryeelka iyo adeegyada adkaan karo. Waxaad u baahan kartaa caawinta lagu xiriirinayo caafimaadkaaga, daawada iyo adeegyada daryeelka muddada dheer. Haddii aad ka qeybqaadatid PACE, kadib waxaad taageero ka heleysaa kooxda daryeelka ee loo tababaray inay daryeel siiyaan maamulka caafimaadka iyo xaaladaha caafimaadka, intaa waxaa dheer baahiyadaada daryeelka muddada dheer.

Waxaad tahay ka qeybqaate firfricoon ee kooxda daryeelka ee sidoo kale ku jiraa, ugu badnaan, dhakhtarka PACE (ama dhakhtarka bulshada), kalkaaliso diiwaangashan, maamulaha daryeelka, xiriiriyaha Xarunta PACE, xiriiriyaha daryeelka guriga, daaweeyaha jirka, daaweeyaha shaqada, daaweeyaha madadaalada iyo qubaraha cuntada. Waxaad dooran kartaa inaad ku darto xubinta qoyskaaga ah ama qofka aad jeceshahay ee kooxdaada. Waqtiga qaarkood dadku waxay doortaan xirfadlayaal uga qeybqaataa sida xubnaha kooxda. Gudaha PACE, kooxdaan waxaa loo yaqaan "kooxda isku dhafan." Qorshooyinka kooxda isku dhafan, waxay gaarsiisaa, iyo kormeertaa daryeelka oo dhammaan goobaha.

Dadku waxya u helaan adeegyada Si ay Ugu noolaadaan Gurigooda Markasta oo ay Suuragal tahay.

Caawinta dadka inay guriga joogaan waa wadnaha barnaamijka PACE. Haddii aad ku nooshahay guri, dabaq, guryo la wada dego ama guri wareega, kooxda PACE way kula shaqayn doontaa adiga markaas waxaad joogi kartaa gurigaaga. Badanka adeegyada waxaa lagu siin karaa xaga guriga dad badan. Haddii aad hadda ka hor degen tahay xarunta taakula nolosha ama guriga daryeelka aanad iska bixin karin adigu, ka dib PACE waxay kugu caawin kartaa inaad hesho meel kale oo aad ku noolaato oo buuxinaysa baahiyahaaga qiime aad u karto inaad iska bixiso. PACE waxay kaala shaqeeyaan adiga inaad hesho oo haleesho xaalada nolosha ee ugu fiican.

Dadka ka Qayb gala Go'aan ka gaadhida Adeegyada ay Helaan.

Tallaabada koowaad ee qoysahsynta adeegyada PACE waa inaad adigu kala hadasho kooxdaada nooca nolosha aad doonayso, haddii aad doonayso inaad ku noolaato halka aad ku nooshahay hadda ama meel ka duwan, nooca taageerada aad u u baahantahay inaad ku buuxiso baahiyadaada muddada dheer. Tallaabada waxaa loogu yeedhaa qiimayn.

Adeegyada aad heli doonto ka dib waxaa lagu muujiyaa qorshaha daryeelka. Xubnaha kooxd waxay kaa taageeraan horumarinta qorshahaaga iyagoo ku siinaya macluumaadka aad u baahantahay si ay u sameeyaan doorashooyin laga warqabo oo ku saabsan daryeelka aad hesho. Qorshaha daryeelkaaga waxay kugu caawineysaa buuxinta baahiyadaada daryeelka muddada dheer si markaas loo gaaro natiijooyinkaaga shaqsiga ah ee noloshaada iyo in kooxdaada lagu aqoonsado qiimeynta.

Dadku waxay doortaan Adeeg bixiyayaal ka socda Shabakad Dhammaystiran.

Ka qeybqaatayaasha PACE waxay doortaan daryeelkooda muddada dheer iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaad ee shabakada bixiyaha. Managed Care Organizations (MCOs), waa hay'adaha siiyaa faa'idada PACE dadka, waxaa looga baahanyahay inay ku leeyihiin bixiyayaal dhammaan adeegyada ku daboolan barnaamijka oo leeyihiin wax ku filan ee lagu siiyo xubnaha dooqa ku saabsan bixiyaha iyo goobta ay ka helaan adeegyadooda.

Intaa waxaa dheer doorashada bixiyayaasha daryeelkaaga muddada dheer oo dhinaca shabakada bixiyaha, ee PACE, waxaad sidoo kale dooratay in dhaqtarkaaga ka imaanayo dhaqaatiirta ee u shaqeeyaa barnaamijka PACE ama dhaqaatiirta kale ee bulshada. Daryeelkaaga caafimaad iyo adeegyada caafimaadka muddada dheer waxaa lagu xiriiriyay qaabka ee barnaamijka ay naqshadeeyeen iyada oo lagu darayo dhakhtarka kooxda. Haddii dhaqtarkaaga uusan qeyb ka aheyn shabakada bixiyaha, barnaamijka PACE waxay kala soo xiriiri karaan dhaqtarkaaga wax ku saabsan ku biirista shabakada bixiyaha.

Haddii aad ku biirtid barnaamijka PACE, caymiska daawada sidoo kale waxaa lagu daraa faa'iidada; Xubnaha PACE waxay ka helaan daawadooda qoran farmashiyada PACE. Haddii aad leedahay Medicare, uma baahnid inaad heshid Medicare gooni ah ee Part D qorshaha daawada. Ma heleysid lacagta canshuurta ama laga jari karo daawooyinka haddii aad iska diiwaangelisid PACE. Xubnaha sidoo kale waxay helaan adeegyada ilkaha sida qeyb ka ah baakida faa'idada.

Fadlan ogow: si aad ugu qalantid PACE, waa inaad ka diiwaangashanaataa qeyb walba ee Medicare ee aad u qalantid.

Dadku waxay ku helaan Adeegyada Ay u baahanyihiin Dhexda Hal Faa'ido.

Kala saarida barnaamijyada dowlada badan si loo go'aamiyo dheefahaaga suuragalka ah inay noqon karaan kuwa wareer leh. Aqbaarta wanaagsan waa mida in PACE bixineyso daryeelkaaga muddada dheer, adeegyada caafimaadka iyo daawada iyo daawooyinka qoran ee haddii kale laga helayo dhinaca barnaamijyada kala duwan ee Medicare iyo Medicaid. Tani waxaa ku jira adeegyada farmashiga si markaas aad u heli kartid daawadaada qoran iyo daawooyinka kale ee dukaanka laga iibsado ee ku haboon.

Dadku waxay helaan Adeegyada Sida Wanaagsa Guul ugu soo hooya Natiijooyinka Ay rabaan.

Guusha PACE waxaa lagu qiyaasaa natiijooyinka nolosha dhabta ah, ama natiijooyinka aadka hesho adeegyada aad hesho. "Natiijooyinka Tayada Nolosha" ee gudaha PACE waxay meteshaa qaybo muhiim ah oo nolosha dadka ah.

Bayaanada xigga waa "Natiijooyinka Tayada Nolosha" ee kooxda PACE ku dadaasho inay kugu caawiso gaarista. Markii aad ka qeybqaadatid barnaamijka, waxaad u qeexday natiijooyinkaaga noloshaada. Kugu caawinayo buuxinta baahiyaha daryeelka xiliga dheer si loo gaadho natiijooyinkaaga gaarka ah waa hadafka PACE:

- Waxaan go'aamiyaa halka iyo cida aan la noolaanayo.
- Waxaan gaaraa go'aanka ku saabsan taageeradeyda iyo adeegyada.
- Waxaan go'aamiyaa sida aan u isticmaalo maalinteyda.
- Waxaan la leeyahay xiriir qoyska iyo saaxiibada.
- Waan sameeyaa waxyaabo aniga ii muhiim ah.
- Waxaan ka qeyb qaataa bulshadeyda.
- Noloshayda way degentahay.
- Waa la i ixtiraamaa oo waxaa la iila dhaqmaa si cadaalad ah.
- Waxaan leeyahay arimaha gaarka ah.
- Waxaan leeyahay caafimaadka ugu wanaagsan ee suuragalka ah.
- Waxaan dareemaa badbaado.
- Waxaan ka xor ahay xad gudub iyo dayac.